

HAGITAANKA MUUNADA KAADIDA LA ARUURIYO MARKA LA KAADINAAYO

Fadlan raac tilmaamahaan hoose:

RAGGA:

- + Iska ilaali wasakheynta muunadda oo ka ilaali inay gaaraan saabuun, saxaro, saliid, budo, iwm.
- + Dib u celi maqaarka hore (haddii aadan gudneyn).
- + Adigoo isticmaalaya maro nadiif ah, nadiifi qaybta hore (madaxa hore ee guska), oo ka bilaabma kaadi mareenka (daloolka ku yaal afka hore ee guska) adoo tirtiraya daloolka kaadi mareenka.
- + Biloow kaadinta. Ku kaadi in yar musqusha, ka dibna inta kaadidu socoto, wheelka kaadida aad ku aruurineyso ku shub kaadi yar oo muuno ah. Kadib marka aad kaadida ku shubto wheelka aad ku aruurineyso, kaadida kugu hartay ku kaadi musqusha. Daboolka ku xir wheelka muunada marka kaadida aad ku shubto.
- + Wheelka kusoo celi meesha aad kugula taliyay dhakhtarka daryeelka caafimaad 24 saacadood gudahood. Muunada ku hay qaboojiyaha ilaa inta laga soo celinayo muunada.

DUMARKA:

- + Iska ilaali wasakheynta muunadda oo ka ilaali inay gaaraan saabuun, saxaro, saliid, budo, iwm.
- + Adoo isticmaalaya hal gacan, kala fogee oo kala qabo geesaha xubinta taranka.
- + Adoo isticmaalaya xaashi qafiif ah, nadiifi geesaha xubinta adoo nadiifinaya gadaal ilaa horey. Samee isla sidaas adoo isticmaalaya hal ilaa labo xaashi oo dheeraad ah.
- + Biloow kaadinta. Ku kaadi in yar musqusha, ka dibna inta kaadidu socoto, wheelka kaadida aad ku aruurineyso ku shub kaadi yar oo muuno ah. Kadib marka aad kaadida ku shubto wheelka aad ku aruurineyso, kaadida kugu hartay ku kaadi musqusha. Daboolka ku xir wheelka muunada marka kaadida aad ku shubto.
- + Wheelka kusoo celi meesha aad kugula taliyay dhakhtarka daryeelka caafimaad 24 saacadood gudahood. Muunada ku hay qaboojiyaha ilaa inta laga soo celinayo muunada.

Muunada kaadida ah ku qor waxyaabahaan soo socda:

- + Magaca
- + Taariikhda dhalashada
- + Lambarka diwaanka Caafimaadka (haddii aad leedahay)
- + Taariikhda iyo waqtiga aad qaaday muunada
- + Saxiixa qofka qaaday